

# Tilmaamaha Go'doominta iyo Ka Saaritaanka ee loogu talagalay Goobaha K-12

**Qaab go'aan gaaristan waxa loogu talagalay in lagu hago shaqaalaha dugsiga si ay u fahmaan cidda u baahan in la gooni-yeelo ama laga saaro dugsiga.**

**Isgooni-yeelidda** waa ugu yaraan mudda 5-maalin oo loogu talagalay dadka laga helay cudurka ama laba calaamadood oo asaasi ah ka dib markii ay u bayla noqdeen COVID-19. Shakhsiyaadka waxa lagula talinayaa in ay maaskaro xirtaan mudda 5 maalmood oo dheeraad ah (maalinta 6-aad ilaa maalinta 10-aad) ka dib marka ay dhamaato muddada 5-tooda maalmood ee go'doominta. Shakhsigu waa inuu sii wadaa isgooni-yeelidda haddii astaamuhu aysan ka bixin maalinta 5.

**Ka Saaritaanka** waxaa loogala jeedaa ka ilaalinta arday ama xubin ka tirsan shaqaalaha bannaanka goobta dugsiga haddii ay soo muujiyaan calaamadaha cudurrada faafa.

**Baaritaanka u bayla noqoshada ee la hormariyey** waxa laga yaabaa inay siiyaan dugsiyada kooxo ay ku jiraan shakhsiyaadka khatartooda sii kordhayso ee qabo cudurro daran (tusaale, shakhsiyaadka qaba xaalado caafimaad oo hooseeya ama xaalada difaaca jirkooda liito, shakhsiyaadka da'doodu tahay 65 iyo ka weyn, iyo kuwa la nool shakhsiyaadka khatartooda sii kordheysa).

